

## Iska ilaali tuugta internetka

Janaayo 20, 2023

Dadka reer Alberta waa inay digtoonaadaan haddii ay helaan farriin sheegaysa inay ka timi dawladda oo ku saabsan lacagaha kaalmada ah.

Dawladda Alberta waxay heshay warbixino farriimo qoraal ah oo laysugu dayayo in lagu khayaameeyo dadka reer Alberta ee warmoogga ah, oo ay ka mid yihiin dadka waayeelka iyo qoysaska laga yaabo inay mutaysteen lacagaha kaalmada ee la bixinayo. Mid ka mid ah farriimaha khayaanada ah, dadka waxa loo sheegayaa inay gujiyaan linki si ay iskaga diiwaangaliyaan lacago bixino si otomaatig ah uga imanaysa bangiga.

Dawladda Alberta marnaba farriin qoraal ah kuu soo diri mayso ama samayn mayso wicitaano aan la codsan si ay kuu waydiistaan macluumaadkaaga gaarka ah.

"Sinaba uma dhici karto in dawladda Alberta kuu soo dirto iimeylo ama farriimo qoraal ah oo ay kaaga codsanayaan macluumaadka barnaamijka kaalmada. Isticmaalayaashu waa inayna marnaba gujin linkiyada ama siinin macluumaadka gaarka ah ama macluumaadka bangiga farriimaha qoraalka ah ama iimeylada."

*Nate Glubish, Wasiirka Teknoolojiyadda iyo Casriyeynta*

Barta Cosiga oo amaan ah onlayna ah oo loogu talo galay lacagaha kaalmada ayey dawladdu furtay Janaayo 18. Qoysaska dakhligoodu ka hooseeyo \$180,000 sannad kasta ayaa u qalma in ay bil kasta ku helaan \$100 canug kasta oo ay gacanta ku hayaan kaasoo ka yar 18 sanno. Dadka da'da ah ee 65 sanno jirka ah ama kasii weyn kuwaas oo dakhligoodu ka hooseeyo \$180,000 aanna qaadan Kaalmada Dadka da'da ah ee Alberta ayaa sidoo kale codsan kara lacagta billaha ah.

Cid kasta oon ku dalban karin onlayn waxay ku dalban kartaa qaab fool ka fool iyadoo u maraysa hay'ad kasta oo diiwaangalineed ama Alberta Supports Centre.

Dadka reer Alberta ee hela kaalmooyin uga yimaada Assured Income for the Severely Handicapped (AISH), Income Support ama the Alberta Seniors Benefit, ama adeegyo uu ka helo barnaamijka Persons with Developmental Disabilities (PDD) horey ayaa loo diiwaangaliyay barnaamijka waxayna si otomaatig ah u heli doonaan lacagta.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Dadka reer Alberta waxa lagu boorinaya inay dalbadaan ama hubiyaan xaaladda Lacagahooga Kaalmada iyagoo ka eegaya barta onleenka ah.
- Haddii aadan hubin ama aad u malayso in tuugnimo lagula soo beegsaday, ku wergeli wixii tabashooyin ah bilayska iyo waliba [Canadian Anti-Fraud Centre](#) arrinta onlayn ahaan ama adigoo wacaya 1-888-495-8501.
- Xaashida taloooyinka iyo khayraad kale oo ku aaddan kahortagga xatooyada aqoonsiga iyo khayaanada macmiilka la xiriirta waxa laga heli karaa alberta.ca [bogga Consumer and Business tips](#).
- Si ay u helaan caawimo dhanka dalabyada lacagaha kaalmada ah, dadka reer Alberta waxay:
  - Wici karaan khadka caawimaadda verified account 1-844-643-2789.
  - Wici karaan Khadka Macluumaadka Affordability Action Plan 1-844-644-9955.
  - Bookhan karaan wakaalad kasta oo diiwaangalineed ama xarunta Alberta Supports Centre si fool-ka-fool ah si ay kaalmo uga helaan 50 goobood iyo in ka badan 100 luuqadood si bilaash ah. Inta lagu gudo jiro muddada codsigu socdo, Alberta Supports waxay bixinaysaa saacado dheeraad ah oo ka bilaabmaya 4:30 galabnimo ilaa 8 habeenimo. Isniinta ilaa Jimcaha, iyo laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 3 galabnimo Sabtiyada.
- Si lamid ah dhammaan ciwaannada oonlaynka ah, dadka Alberta waa inay adeegsadaan baasweero adag aysana cid kale u sheegin baasweerkooda. Tilmaamaha ku saabsan sida loo samaysto baasweer adag waxaa laga heli karaa barta codsiga.
- Macluumaad dheeraad ah, oo uu ka mid yahay fiidiyaw sharraxaya qaabka loo adeegsanayo iyo jawaabo lagaga jawaabayso su'aalaha, ayaa onleenka laga helayaa.

## Macluumaadka la xiriira

- [Dalbo lacagaha kaalmada](#)

## Warbaahinta kala duwan

- Iska ilaalinta tuugta internetka